



## Australian Government

### Coronavirus (COVID-19) — Macluumaadka loogu talagalay bulshada Australia

#### **Badbaadi nafaf oo caawi gaabinta ku faafitaanka coronavirus ka Australia gudaheeda**

##### **GURIGA JOOG**

- Guriga haka tegin inaad u baahan tahay mooyee.
- Waa inaad iska ilaalisaa uga tegida gurigaaga wixii waxqabad aan muhiim ahayn.
- Gurigaaga ha ku martiqaadin saaxiibo ama qoys.
- Guriga joog haddii aadan u baahneyn inaad:
  - waxbarasho ama shaqo aadid (haddii aadan awoodin inaad guriga ku qabatid)
  - soo gadaneysid alaabta muhiimka ah sida cuntada ( guriga ugu soo noqo si aan dib u dhac lahayn)
  - dibeda u aadeysid jimicsi shakhsiyeed agagaarka kuu dhow, keligaa ama adiga iyo qof kale
  - tegeysid balamaha caafimaadka ama booqashooyinka u naxariisashada leh.
- Aadeysid adeegyada caafimaadka, dukaamada waaweyn, bangiyada, kaalimaha shidaalka, adeegyada guri geynta iyo boostu way furnaanayaan.

##### **AMMAAN U AHOW**

- Had iyo jeer ku celceli nadaafada wanaagsan, gacmahaaga ku dhaq ilaa 20 ilbiriqsi biyo iyo saabuun, dabool qufacaaga, iska ilaali taabashada indhahaaga, sanko iyo afka.
- Ilaali kala fogaanta bulshadeed ugu yaraan 1.5 mitir markaad guriga bannaankiisa joogtid.
- Iska ilaali salaamaha jireed sida gacan qaadista, habsiinta iyo shuminta.
- Isticmaal kaar ku bixinta meeshii aad lacag caddaan ah isticmaali lahayd.
- Safar wakhtiyada degan oo iska ilaali saxmada.
- Ahow qof warka haya – isticmaal oo kaliya macluumaadka rasmiga ah ee lagu kalsoon yahay. La soo deg app ka taleefanka gacanta ee Coronavirus Australia, iskqor adeega WhatsApp ee Coronavirus Australia, oo booqo [www.australia.gov.au](http://www.australia.gov.au) wixii ah macluumaadkii ugu danbeeyey.

##### **ISKU XIRNAADA**

- Ku jeegaree saaxiibada iyo qoyska taleefan iyo online ka.
- Ugee cuntooyinka iyo alaabta muhiimka ah qaraabada da'da ah iyo dadka nuqul. Kaga tag albaabka.
- Ururada iskaa wax uqabso iyo samafalayaasha ayaa siin kara adeegyo dadka ugu baahida badan.

## **Macluumaadka caafimaadka**

Astaamaha coronavirus waxaa ka mid ah:

- xumad
- qufac
- cune xannuun
- daal
- neefta oo kugu yaraata

Haddii aad jiran tahay oo aad umaleynaysid inaad qabtid coronavirus, doono caawimaad caafimaad.

Waxaad wici kartaa Khadka caafimaada Qaranka ee Coronavirus wixii macluumaad ah. Haddii aad u baahan tahay adeegyada turjumaada qoraalka ama afka, wac 131 450.

Haddii aad leedahay astaamo khatar ah sida neefsiga oo kugu adkaada, wac 000 wixii ah caawimaad caafimaad oo degdeg ah.

Website ka Wasaaradda Caafimaadka wuxuu leeyahay macluumaad fara badan oo lagu helayo luuqado aan ingiriis ahayn si ay looga caawiyo dadku inay ammaan ahaadaan oo laga yareeyo khatarta bulshada ay u leedahay.

## **Taageerada lacageed ee loogu talagalay shakhiyaadka iyo qoysaska**

Dawlada austraaliya waxay bixineysaa caawimaad lacageed dadka austraaliyaanka ah si looga caawiyo faafitaanka coronavirus ka. Caawimaadan waxaa ka mid ah lacagaha taageerada dakhliga , lacagaha taageeada qoysaska iyo hore u siideynta superannuation ku meelgaarka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [www.servicesaustralia.gov.au](http://www.servicesaustralia.gov.au).

## **Taageerada lacageed ee loogu talagalay ganacsiyada**

Dawlada Australia waxay taageeraysaa ganacsiyada Australia si ay u maareeyaan loolanka lacagta soogaleysa oo ay shaqaalaha u ceshadaan. Caawimaada waxaa ka mid ah taageerada lacageed ee ganacsiyada iyo talaabooyinka ku meel gaarka ah si looga debsiyo cidhiidhiga lacageed ganacsiyada.

## **Lacagta bixinta shaqo heynta (JobKeeper payment)**

Haddii ganacsigaaga si xooggan uu u saameeyey coronavirus waxaad awoodi doontaa inaad hesho kabitaanka mushaarka si aad u sii wadid lacag siinta shaqaalahaaga, sida waafaqsan barnaamijka JobKeeper, waxaad awoodi doontaa inaad dalbato lacag bixin dhan \$1500 labadii toddobaadba qofkii shaqaale ah ee kasta oo xaq u leh laga bilaabo 30 Maarso 2020, ugu badnaan lix bilood. Caawimaadan waxay kaa caawineysaa inaad shaqaalaha heysatid iyo inay kaa caawiso inaad dib u bilowdid marka xannuunkan faafay dhammaado. Wixii macluumaad dheeraad ah eek u saabsan taageerada lacageed, xaq u yeelashada iyo wakhtigaba, booqo [www.business.gov.au](http://www.business.gov.au)

## **Guri ka saarid maya**

Guri kasaarida waxaa joojinayaa ilaa lix bilood dawlada gobolka iyo territory -ga. Mulkiilayaasha iyo kireystayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka hadlaan heshiisyo wakhti gaaban ah.

## **Xannibaadaha safarka**

Mamnuucida safarka ay dhaqangashay oo ka hortegaysa in dhammaan muwaadiniinta aan Australian ka ahayni iyo kuwaan degenayaasha ahayni soo gelin Australia.

Dadka laga soo reebayo mamnuucida safarka waxaa ka mid ah xubnaha qoyska ee dhow ee muwaadiniinta Australian ka ah iyo degenayaasha joogtada ah oo ay ku jiraan dadka isqada, ku tiirsanayaasha aan qaangaadhka ahayn, masuuliinta sharciga ah, dadka wada degan ee aan isqabin ka dib markay yimaadaan Australia, dhammaan safarka waxaa laga doonayaa inay dhammeystaan 14 maalmood oo karantiin ah.

## **Macluumaadka loogu talagalay kuwa fiisaha ku meelgaarka ah heysta**

Kuwa fiisaha heysta ee doonaya inay Australia sii joogaan ka dib fiisahoodu markuu dhaco waxay u baahan yihiin inay dalbadaan fiise dheeraad ah. Kuwa fiisaha heysta waa inay sahamiyaan doorashooyinkooda fiise si ay u helaan fiise cusub oo ku haboon xaaladooda waana inay jeegareeyey haddii ay dalban karaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fiisooyinka iyo xanibaadaha safarka, booqo [www.covid19.homeaffairs.gov.au](http://www.covid19.homeaffairs.gov.au)